- Daawaynta ilkaha, tijaabada aragga iyo kharashka socdaalka ee tagiska iyo ka imaanshaha cusbitaal ee NHS
- Daawaynta qaar kamid ah cudurada la isqaadsiiyo (ooy kujirto TB-da) iyo cudurada galmada la isku qaadsiiyo
- Baadhitaanda HIV/AIDS

Fadlan ogow in daawaynta cusbitaal taasi oo hore u bilaabantay ay sii soconayso ilaa aad waddanka ka tagto.

**Miyaan u baahanahay inaan bixiyo lacagta daawadayda?**

Dhakhtarkaagu waxa dhici karta inuu kuu qoro daawooyin kuna siiyo daawo qoris. Waxaad u baahan tahay inaad ka qaadato daawada laguu qoray farmasiga ugu dhaw. Dadka qaangaarka ah badankoodu waa inay iska bixiyaan lacagta daawada loo qoray laakiin tani waa bilaa lacag haddaad haysato shahaadada HC2. Haddaad ka helayso taageerada magangalyo UKBA waxa lagu siiyey shahaadada HC2. Haddaanad ka helin taageerada magangalyo UKBA waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foom HC1 si aad u hesho shahaadada HC2.

**Daryeelka hooyada**

Daryeelka hooyada waxa kujira daryeelka haweenayda uurka leh, dhalashada ilmaha ee cusbitaal iyo daryeelka dhalmada kadib. GP-gaagu wuxuu ku siin tafaasiisha caawimada NHS kahor, inta lagu jiro iyo kadib dhalashada ilmaha. Haweenka magangalyo doonka ah kuwaasi oo sugaya natiijada dalabkooda magangalyo, oo ay kujiraan rafcaanada, la waydiin mayo inay iska bixiyaan lacagta adeegyada hooyo. Hase yeeshee, haweenka leh diidmo ugu dambaysa ee magangalyo waxa dhici karta in lagu dallaco adeegyadan laakiin hagista NHS waxay dhahaysaa in daryeelka hooyo 'si dhakhso ah lama-huraan yahay' ayna tahay inaan laga horjoogsan marka haweenaydu ayna awoodin inay iska bixiso. Cusbitaalku waxa dhici karta inuu kaaga baahdo macluumaad ku saabsan qorshayaashaada inaad guriga ku laabato si aad uga caawiso inay abuuraan degdegnimada daawaynta loo baahan yahay. Fadlan ogow in cusbitaalada ay ka go'an tahay inay bixiyaan daawayn xiitaa marka aan rajo laga qabin bukaanku inuu lacagta iska bixinayo.

**Macluumaad dheeraad ah**

Haddaad ku sugan tahay Inglaan, macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan NHS ee www.nhs.uk ama taleefanka NHS Direct 111. Haddaad ku sugan tahay Weylis, eeg www.nhsdirect.wales.nhs.uk. Iskotlaan, talada caafimaad waxa laga heli karaa NHS 24: www.nhs24.com Waqooyiga Ayrlaan, macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan adeegyada NHS waxa laga heli karaa Adeegga Macluumaadka Caafimaadka 0800 665 544.

Warqaddan waxa soosaaray Shabakadda Saaxiibka Caafimaadka(Health Befriending Network) oo ay maalgalisay Volunteering Fund Health & Social Care.

volunteering fund
health & social care

Refugee Council, PO Box 68614,
London E15 9DQ
**www.refugeecouncil.org.uk**

**Somali**

# Ma u baahan tahay caawimo si aad galaangal ugu hesho daryeelka caafimaad?

**Published in April 2013**

**British Refugee Council (commonly called the Refugee Council) is a company registered in England and Wales, [No.2727514] and a registered charity, [No.1014576]**

Warqaddani waxay sharxaysaa waxa ay yihiin adeegyada Adeegga Caafimaadka Qaranka(National Health Service) (NHS) ay bixiyaan iyo adeegyada loo heli karo magangalyo doonka oo bilaa lacag ah marxalado kala duwan ee habsocodka magangalyada.

Fadlan ogow in macluumaadka warqaddani ay tixraacayso dadka ku nool Inglaan. Waxa jira kala duwanaasho waxa ay tahay caawimada laga heli karo gobolada UK ee kala duwan. Waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad dhammaadka warqaddan.

**Waa maxay Adeegga Caafimaadka Qaranka?**

UK, Adeegga Caafimaadka Qaranku (NHS) waxay siisaa adeegyo caafimaad oo badan oo bilaa lacag ah dadka u baahan daawayn caafimaad. Waxay ku samayso iyadoo sii marta: dhakhtarada qoyska (ee la dhaho GPs), rugaha caafimaad, cusbitaalada, dhakhtarada ilkaha, adeegyada hooyada, dhakhtarada indhaha iyo kimistiyada. NHS waxay sidoo kale caawin kartaa xakamaynta dhalmada ama qorshaynta qoyska.

**Sideen uga heli karaa daawayn caarimaad GP?**

Haddii qofi xanuunsanayo laakiin aanu u baahnayn daawayn cusbitaal oo degdeg ah, wuxuu inta badan aadaa dhakhtarka qoyska
(GP). GP-yadu waxay ogaan karaan oo daawayn karaan xanuunada laakiin waxay kuu gudbin khabiiro kale oo aad ugu habboon daawaynta xanuunkaas. Xaalado badan tani waxay ka dhigan tahay u dirista qof cusbitaal si daawayn caafimaad oo dheeraad ah loogu sameeyo. Aad ayey muhiim u tahay inaad iska diiwaangaliso GP kahor intaanad xanuusan sababtoo ah waa GP-kaaga kan galaangalka u yeelan karto dartiis inta badan adeegyada caafimaad ee kale. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa talo caafimaad iyo macluumaad kusaabsna dhibaato caafimaad adoo waca Agaasinka NHS (NHS Direct) khadka caawimada 111, www.nhsdirect.nhs.uk

**Sideen ku helaa GP?**

Liiska dhakhtarada deegaanka ayaa laga heli karaa laybareeriga kuugu dhaw, websaytka NHS Direct, dadka ku nool xaafaddaada ama kireeyahaaga haddaad ku nooshahay hoy ay bixisay Wakaaladda Xaduudka UK (UK Border Agency) (UKBA). Hubso inaad dooratay dhakhtar si fudud aad u heli karto. Waxaad dooran kartaa haddaad doorbiddo GP haweenay ah. Dhakhtarka deegaan sida qaalibka ah wuxuu kaliya aqbalaa dadka ku nool ama jooga mandaqadda. Haddaanad ku hadlin Ingiriisi kugu filan u sheeg soo-dhaweeyaha inaad u baahan tahay tarjumaan markaad qabsanayso ballan aad ku aragto GP-gaaga

**Sideen iskaga diiwaangaliyaa GP?**

Laguuma diidi karo diiwaangalinta sababtoo ah waxaad tahay magangalyo doon. Haddii GP-ga horeba bukaanadu ugu badnaayeen wuxuu diidi karaa inuu ku diiwaangaliyo. Markay sidani dhacdo waa inaad iska diiwaangalisaa GP kale. Marka lagu diiwaangaliyo waxa ay kalkaaliso ku marin baadhis caafimaad oo ballaadhan. Marka lagaa diiwaangaliyo GP, waxaad samayn kartaa ballamo si aad ugu la kulanto xafiiska.

**Maxaa la sameeyaa xaaladda gurmadka?**

Haddaad shil gashay ama xanuun halis ah oo lama filaan ah waa inaad la xidhiidho waaxda Shilka iyo Gurmadka (Accident and Emergency) ee cusbitaalka ugu dhaw.

Waxaad samayn kartaa sidaad rabto halkaas laakiin inta badan dadku waxay wacaan 999 waxayna codsadaan ambalaas. Daawaynta caafimaad ee gurmadyadu aalaaba waa bilaa lacag.

**Dalabkaygii magangalyo waa la diiday, rafcaan ayaan qaadanaya, adeegyadee NHS ayaan mutaystay?**

Magangalyo doonku waxay mutaysteen daryeel caafimaad oo ay ka helaan dhammaan adeegyada NHS inta ay sugayaan natiijada dalabkooda magangalyo iyo rafcaanada. Waxay ku heli karaan bilaa lacag:

- daawaynta GP
- daawaynta aan gurmadka ahayn ee cusbitaalka ooy kujirto adeegyada hooyadu
- daawayn gurmad oo cusbitaalka ee waaxda Shilka iyo Gurmadka
- daawo qorisyo
- daawaynta NHS ee ilkeed, baadhista arag iyo kharashka socdaalka tagista iyo ka imaanshaha cusbitaal
- daawaynta cudurada la is-qaadsiiyo (ooy kujirto TB-da) cudurada galmada lagu kala qaado
- baadhitaanada HIV/AIDS iyo daawaynta

**Dalabkayga magangalyo ugu dambayntii waa la diiday, adeegyadee NHS ayaan mutaystay?**

Haddii cabashadaada magangalyo la diido ugu dambaynta rafcaanadaaduna guulaysan waayaan laakiin aanad awoodin inaad waddanka ka baxdo, waxaa bilaa lacag ku heli kartaa:

- daawaynta GP
- daawaynta cusbitaal laakiin kaliya haddii daawayntu bilaabantay kahor intaanad helin diidmada magangalyo ee ugu dambaysa
- daawaynta cusbitaal ee gurmadka ah ee waaxda Shilka iyo Gurmadka
- Daawo qorisaha

**Published in April 2013** **British Refugee Council (commonly called the Refugee Council) is a company registered in England and Wales, [No.2727514] and a registered charity, [No.1014576]**